

Xukuumadda Soomaaliya

Xeerka Maamulka 15 Maarso 1957, lamba. 60 rep.

Guddiga loo xilsaaray in ay ka soo shaqeeyaan Xeerka Madaniga Soomaaliya.

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 27 Disembar lamba. 19, ee Xukuumadda Soomaaliya u wakiishay in ay soo saaraan Xeerka Madaniga;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Guddiga soo darsa kana soo shaqeeya mashruuca ku saabsan Xeerka la soo sheegay;

Marka uu dhagaystay Golaha Wasiirada;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisay guddii ka soo shaqeeya daraasadda Xeerka Madaniga Soomaaliya oo ka kooban

Guddoomiye:	Wasiirka Arrimaha Guud Maxamed Cabdi Nuur
Xubin:	Xildhibaan Sh. Cabdi Faqi Cabdow
“	ildhibaan Abshir Faarax Samatar
“	Caburaxmaan Xaaji Muumin
“	Xildhibaan Cusmaan Axmed Rooble
“	Xildhibaan Xaaji Cabdulqaadir Bin Abubakar
“	Khabiir Ishia Xaaji Cabdullaahi
“	Khabiir Spadaro Dr. Salvatore
“	Khabiir Rizetto Dr. Fulvio
“	Khabiir Benvenuto Francesco Isaaq
“	Sh. Abubakar Xaaji Cabdullhi
“	Xoghaye Tucci Dr. Mario

Qod. 2

Guddigaan sharciyan waxaa xubin ka noqonaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ama garsoore uu isagu soo magacaabo.

Qod. 3

Guddiga saldhiggiisu wuxuu noqonayaa Garyaqaanka Guud kaasoo loo xilsaaray in uu hawlaha guddiyada kale.

Qod. 4

Qoraal doodeedka (maxdarka) waxaa fadhi kasta ka samaynaya xoghayaha kaaso lagu soo darayo warbixinta kama dambaysta ah.

Qod. 5

Xubnaha guddiga waxaa u sugnaatay dhaqaale ay ku qaadanayaan ka soo qaybgalka fadhiyada sida ku cad qod. 2 ee Dekereetada 10 Setembar 1956, lamba. 94

Kharashk arrinta la xariira wuxu saaranyahay Cutubka 76 – ee hawlgal miisaaniyadeedka.

Muqdisho, 15 Maarso 1957.

Maamulaha

P. Franco

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Waa la Hubiyay lana Diiwaangaliyay – Diw. Lamba. 2, bogga lamba. 109.

Muqdisho 30 Maarso 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**